

Sharciga 2 Maarso 1960, lamba. 13 diw.
Baabi'inta Sheegatanimada

MAAMULAHA

Markuu arkay ansixinta Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GUDDOONINAYA SOONA SAARAYAA:

Sharcigan soo socda:

Qod. 1

Waxaa la baabi'iyey arrinta dhaqanka (soo-jireenga) ee Sheegatanimda.

Qod. 2

Wasiirka Arrimaha Gudaha waxa uu u idman yahay in uu soo saaro xeerarka lagama maarmaanka u ah fulinta sharcigan.

Qod. 3

Sharciga waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah.

Sharigan waxaa la gelnayaa Ururinta Rasmiga, ee Sharciyada, waxaana lagu nashriyaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta waxa uu ku khasban yahay in uu dhowro, loona dhowro sharci ay Soomaaliya ahaan.

Taariikhda Muqdisho, maanta oo ah 2da Maarso 1960.

Maamulaha
Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad
Cabdullahi Ciise Maxamuud